



## Amtrak Cascades

Waaxda Gaadiidka ee Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation, WSDOT) ayaa baaraysa qayb kamid ah adeegga rakaabka tareenka oo isku xira -5 corridor oo ka dhex shaqeeya eattle iyo Vancouver, British Columbia iyo inta u dhexaysa Seattle iyo Portland, Oregon.

	Safarada Hadda ee Maalin laha ah ee sii socod iyo soo Socod	Safarada Lasoo celiyay Kadib Aafada ee Maalin laha ah ee sii socod iyo soo Socod
Seattle ilaa Portland	3	6
Seattle iyo Vancouver, B.C.	1	2
Portland iyo Eugene	2	2

WSDOT waxay dhisaysaa Qorshaha Hormarinta Adeegga si hormarin loogu sameeyo adeegga Amtrak Cascades ee gobalka Washington. Si loo bilaabo dedaalkaan, kooxda mashruuca ayaa diyaarisay Bayaanka Ujeedada iyo Baahida ree Biloowga ah kaasoo loo adeegsan doono hagista hormarinta, qiimaynta iyo xulashada istaraatiijiyadaha si kor loogu qaado isku xirka adeegga rakaabka tareennada. **WSDOT waxay doonaysaa inay fikirkaaga ogaato! Ma jiraan baahiyo safar iyo muhiimado ka baxsan kuwa hoos ku qoran oo ay tahay in kooxda mashruucu qorshaha ku darto?**

Ujeedada iyo baahida Qorshaha Hormarinta Adeegga waa in loo hormariyo adeegga Amtrak Cascades qaab:

1. Siinaaya dookhyada safarka oo dheeri ah magaalooyinka xili bulshooyinka iyo fursadaha shaqadu ay sii kordhayaan.
2. Xoojinaaya isku xirka u dhexeeya dhammaan noocyada kaladuwan ee gaadiidka, ayna ku jiraan tareennada dadka qaada iyo adeegyada gaadiidka ee maxaliga ah.
3. Taageeraaya higsiyada hoos u dhigista gaaska cagaaran ee gobalka Washington.
4. Ka dhigaaya gaadiidka mid uu heli karo qof kasta si siman.
5. Taageeraaya kobaca dhaqaalaha ee bulshada dagan astaannada gaadiidka.
6. Difaacaaya ilaalinaayana awooda tareenka si uu u buuxsho baahiyaha rakaabka iyo maraakiibta.
7. Kahortagaaya oo yaraynaaya saamaynada bulshada iyo bii'ada.
8. Ah maal gelin u qalanta lacagta canshuurta.

Waxaad kala xiriiri kartaa kooxda mashruuca adoo iimeel u diraya [cascadesSDP@wsdot.wa.gov](mailto:cascadesSDP@wsdot.wa.gov).